Caddad gaar ah oo ku saabsan Caafimaadka, Nafaqeynta iyo Badbaadada



# Carruurteena "our children"

Warsidaha UNICEF Soomaaliya Nofembar 2008

## Badbaadada Carruurta: Arrin Muhiim u ah Caalamka oo Dhan

Badbaadada carruurtu waa arrin caalami ah oo UNICEF muhiim u ah gaar ahaan Soomaaliya. Degaannada ay ka jirto baahida daran iyo hantida yari, waxa doodaha la xiriira horumarinta ay la halmaalaan in la maalgelinayo maamulka, nabadgelyada, sharciga iyo kala dambeynta, dhaqaalaha iyo hanti-abuuridda, kaabayaasha, dhiirigelinta alaabta ay dadweynuhu u baahan yihiin ama bixinta adeegyada aasaasiga ah. Wax laga doodo maba ahan arrinta la xiriirta badbaadada carruurta. Heerka ay doonto ha ahaatee ku dhowaad dhammaan dadka oo dhan waxa ay xiiso u hayaan in ay carruurtu badbaaddo: ilmuhu ha ka tirsanaadeen gurigooda, bulshadooda ama dalkooda.

Ma ahan in ay carruurtu dhintaan marka waxqabadyo aan qaali ahayn oo la hubiyey ay si taabogal ah uga hortegi karaan geerida carruurta. Haddii ay carruurtu u dhimanayaan sababo laga hortegi waa in markaa aan tallaabo qaadnaa! Muhiimadda in arrintaan la sameeyo waxa ay dhaafsiisan tahay qaybsanaanteena diimeed, middeena siyaasadeed iyo tan hay'adeed waana mid inagu kulmineysa ujeeddo iyo tallaaboqaadba.

Badbaadada carruurtu waa mid muhiim u ah waxqabadyada ay UNICEF ka waddo Soomaaliya. Wax kasta oo aan sameyneyno waxa ay ujeeddadiisu tahay kor-u-qaadidda helidda adeegyada dalyeelka. Laakiin arrinta ugu muhiimsani waa in carruurta iyo hooyooyinkoodu ay badbaadaan. Soomaaliya waa dal, xitaa waqtiyada beri-samaadka, mid ka mid ah toddobadii carruur ahba uu dhimanayo inta aanu shan jirsan iyada oo waxqabadyo fudud oo isbeddel weyn keeni lahaa aanay marna gaarin wax ka badan 50% carruurta (waxaana marar badan ay gaaraan wax ka yar 20%).

Maxay yihiin waqabadyaani? Waxqabadyada ay ka mid yihiin carruurta oo laga tallaalo cudurada ugu badan ee carruurta ku dhaca, naas-nuujin barax-la', gacmo-dhaqashada ka dib marka mushqusha la isticmaalo iyo ka hor inta aan cuntada la diyaarin oo aan la cunin, fitamiin A dheeri ah, karkarin biyaha la cabbo iyo carruurta oo laga daweeyo deris-ku-noosha mindhicirada gasha.

Ka hortagga iyo daweynta nafaqo-darrada ba'an iyo cudurrada caabuqyada fudud ah ayaa ay tahay ujeeddada aan Soomaaliya ka leenahay hadda taa ayaana ay ahaan doontaa sanadaha soo socda. Si aan haddaba u qabanno hawl wanaagsan waa in aan is weydiiinaa muxuu ilmo kasta oo Soomaaliya jooga uu xaq u leeyahay sideese u gaari karnaa ilmo kasta?

Marka aan fahamno sababaha keena geerida badan ee carruurta iyo sida wax looga qaban karo markaa shaqadeena waxaa hagaya mas'uuliyaddeena ah in aan gaarsiinno xirmo isku jirto oo ah tallaabooyin lagu ilaalinayo oo xal u ah dhammaan carruurta.

Maaddaama waxyaabaha ka dhacaya Soomaaliya ay carruurta halis u gelinayaan rabshado, dhaawac, barokac, baahi iyo cudur, hawsha UNICEF oo ah – hubinta badbaadada carruurta – ayaa noqoneysa tan ugu muhiimsan.

Waxa aan jeclaan lahayn in aan fursaddan uga faa'iideysano in aan u mahad celino la-hawlgalayaasheen deeqbixiyeyaasha ah ee qaaraanka ka geystey caafimaadka iyo wanaagga carruurta Soomaaliyeed iyaga oo deeqo siiyey UNICEF. Waxa aan sidoo kale jeclaan lahayn in aan u mahadcelino madaxda caafimaadka iyo sidoo kale la-hawlgalayaasheen (NGO-yada caalamiga ah iyo kuwa degaankaba) dadaalkooda iyo taageerada ay siiyeen barnaamijyada badbaadada carruurta.

*Christian*

Christian Balslev-Olesen
Wakiilka UNICEF, Soomaaliya

**CADDADKAN KA AKHRISO**


| | |
|---|---|
| Faallada Wakiilka | 1 |
| Maalmaha Caafimaadka Carruurta | 1-2 |
| *Plumpy'doz* | 2-3 |
| Soo barakacayaasha Boosaaso | 3 |
| Ololaha ka hortagga Jadeecada | 4 |
| Ka hortagga Duumada | 5 |
| Isticmaalka Marokaneecada | 5 |
| Tallaabada Bulshada ee Nafaqeynta | 6 |
| Wararka Cudurka Dabaysha | 6 |
| Casharro la Bartey | 7 |
| Nagala soo xiriir | 7 |


## Soomaaliya oo bilaabeysa 'Maalmaha Caafimaadka Carruurta" : Maxay? Goorma? Halkee? Sabab?

Xaddiga dhimmashada carruurta ka yar shan jirka iyo hooyooyinka ee Soomaaliya ayaa ka mid ah kuwa ugu sarreeya dunida oo dhan. Inta ay nooshahay, hooyada caadiga ah ee Soomaaliyeed waxa ay u badan tahay in ay dhasho lix carruur ah haddana mid ka mid ah 10kii carruur ahiba waxa uu dhintaa bil gudaheeda marka uu dhasho. Sidaa si la mid ah mid ka mid ah 100kii haween ahi waxa ay u dhimataa sababo la xiriira uurka ama ilmo dhalista.

Cudurada faafa, oo ay ugu cadcad yihiin caabuqyada neef-mareenka iyo shubanka ayaa ah kuwa ugu badan ee ay u dhintaan dhallaanka iyo carruurta yaryar, kuwaas oo keena wax ka badan kalabar dhimashada carruurta Soomaaliya, in kasta oo marka ay dilaacaan jadeecada iyo dhibaatooyinka la xiriira ay keenaan xannuuno ballaaran iyo geeri soo degdegta. Biyo aan ammaan ahayn, fayadhowr-xumo iyo nadaafad yaraan oo ay la socdaan xaaladaha caafimaad darro oo keena dhimashada iyo silica carruurta. Nafaqo-xumada ayaa ah dhibaato dabadheer oo Soomaaliya ka jirta, iyada oo 25 boqolkiiba ay carruurtu yihiin kuwo miisaankoodu yar yahay (nafaqo-xumo dhexdhexaad ah iyo mid ba'anba hayso).

Ka dib markii ay burburtey dowladdii Soomaaliya 1991 oo taana ay keentey burburka nidaamkii daryeelka caafimaadka, burburkii adeegyada daryeelka caafimaadka sida tallaalkii joogtada ahaa, dabargoynta cudurka dabeysha, iyo adeegyadii degdegga ku socdey ee lagu xakameynayey jadeecada ayaa hakad galey Soomaaliya oo dhan. Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya (oo ay badi dadka dalka deggan ku nool yihiin), ayaa adeegyada caafimaadka si yar loo helaa sababtuna waa burburka iyo nabadgelyo xumada jirta.

Iyada oo ay taa jirto haddana tallaalka ayaa ka mid ah waxqabadyada caafimaad ee sida weyn loogu guuleystey ee

**Mid ka mid ah 100kii haween Soomaali ah ayaa u geeriyoota uurka iyo sababo la xiriira...**

## Soomaaliya oo bilaabeysa 'Maalmaha Caafimaadka Carruurta" : Maxay? Goorma? Halkee? Sabab?

qiimahooduna ugu jaban yahay, waxaana adeegsigooda uu keeney dabargoynta furuqa, iyo in gobollada qaar laga dabargooyo jadeecada iyo cudurka dabaysha, iyo in si weyn loo dhimo dhimashada iyo silica ay keenaan qummanka (*diphtheria), kojiyaha* (*teetanada*) iyo Xiiq-dheerta (*pertussis).* Sanadkii 2006, keliya 12% carruurta Soomaalida ah ee ka yar hal sano ayaa si buuxda looga tallaaley qummanka (*Diphtheria),* Kojiyaha iyo xiiq-dheerta (*Pertussis*-DPT), halka tallaalka jadeecadu uu gaarey keliya 19% (MICS, 2006). Keliya qiyaastii 5% carruurta ka yar hal sano ayaa qaatey dhammaan lixda tallaal ee lagu taliyey.



*Waxa laga soo dheegtey: WHO Mortality Country Fact Sheet 2006*

Min 2005tii ilaa 2007dii, qiyaastii 3 milyan oo carruur da'doodu ay u dhaxayso 9 bilood ilaa 15 sano ayaa looga tallaaley jadeecada olole dalka oo dhan ka dhacay oo lagu yareynayay geerida ay keento jadeecada kaas oo ay hoggaaminayeen UNICEF, WHO iyo la-hawlgaleyaal kale. Ololahaani waxa uu keeney in xaaladaha jadeecadu ay hoos uga soo degaan min 3,836 xaaladood oo dhacay nuskii hore ee 2006 ayna hoos ugu dhaceen 564 xaaladood isla muddadaas sanadkii 2007, iyada oo keliya sagaal dhimasho la soo sheegey nuskii hore ee sanadkii 2007. Haseyeeshee, iyada oo tallaalka jadeecadu uu hadda gaarsiisan yahay qiyaastii 30 boqolkiiba dalka Soomaaliya ayaa ah mid aad uga fog ku filnaansho ay ku filnaato in ay ka hortagto faafidda cudurrada looga hortegi karo tallaalka.

Waxqabadyada hadda jira ee la hubiyey, kharashkooduna yar yahay, ee aan u baahneyn tijnoolojiyad sarreysa oo waxtarkooduna sarreeyo sida tallaalka, siinta nafaqada yaryar ee dheeriga ah, dhiirrigelinta caadooyinka naas-nuujinta iyo ka caadodhigashada hab-dhaqanka nadaafadda amaanka ah ayaa ka hortegi kara dhimasho aan loo baahneyn oo ku timaadda hooyada iyo carruurta iyada oo haddana yareyn karta nafaqo-yaraanta. Xaqiiqooyin lagu ogaadey barnaamijyadii degdegga ahaa ee lagu badbaadinayey carruurta iyo kuwo horumarinta ee laga fuliyey dalal kale oo Afrikaan ah (Sinigal, Mali, Beninin iyo Ghana) sanadihii 2002 – 2004, ayaa tilmaamaya in marka kor loo qaado gaarsiinta xirmada waxqabadyada saameynta sareysa leh, ay markaa dhimashada carruurta ka yar shan jirka ayaa celcelis ahaan, hoos u dhacdey 20%, markaasna hal sano la badbaadiyey nolosha qiyaastii 5,500 carruur ah.

Garwaaqsashada baahida loo qabo in loo dardargeliyo hawsha badbaadada iyo horumarinta carruurta ee Soomaaliya si waafaqsan Yoolka 4aad ee Horumarka Kunka Sanno (MDG 4) si loo yareeyo dhimashada carruurta ka yar shan jirka, UNICEF iyo WHO, iyaga oo kaashanaya la-hawlgalayaashooda degaanka iyo NGO-yada, ayaa ku dhaqaaqey barnaamij ballaaran oo waxqabadyo naf lagu badbaadinayo lagu gaarsiinayo ugu yaraan 1.5 milyan oo carruur shan jir ka yar ah iyo in ka badan hal milyan oo haween da'dii dhalmada ku jira ah oo dalka oo dhan ku nool lixdii biloodba mar. Xirmada Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxaa ku jira tallaalid, goryaan-ka-dilid, baaritaanka nafaqada, milanka cusbada fuuq-celinta, iyo qaybinta fitamin A dheeri ah iyo sidoo kale gaarsiinta biyo, waxqabadyada fayadhowrka iyo nadaafadda kor loogu qaadayo sida nadiifinta biyaha, iyo waxbarashada caafimaadka.

Ujeeddadu waa in la gaaro dhammaaan qaybaha dalka inta uu socdo ololaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta iyada oo loo marayo jadwal adeegyo qorsheysan oo ku wajahan dadweynaha ama istiraatiijiyadaha ololayaasha, iyada oo gacan laga helayo la-hawlgalayaal dadaal badan, iyada oo laga qaybgeliyo xubno bulshada ka tirsan iyo NGO-yada. Ololaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxa uu markaa yahay dib-u-soo-nooleynta ballanqaadka iyo dadaallada lagu kordhinayo gaarsiinta iyo bixinta waxqabadyada caafimaadka ee muhiimka ah oo raadka ballaaranna reeba oo la gaarsiiyo tirada ugu badan ee carruur Soomaaliyeed ee la gaarsiin karo.

## *Plumpy'doz:* Dhammeystiridda daaweynta degdegga ah ee nafaqo-xumada ba'an

Carruurtu waxa ay nafaqo-xumaadaan marka aaney helin nafaqada ku filan ee uu jirkoodu u baahan yahay si uu ula dagaallamo caabuqa uuna u koro. Marka ay nafaqadu aad ugu yaraato, ilmaha ayaa bilaabaya in uu 'caatoobo' (dhab ahaan u nafaqoxumaado) – maaddaama uu jirka ilmuhu bilaabayo in uu isticmaalo nudayaashiisa si uu uga helo nafaqadii uu u baahnaa. Nafaqo-xumadu waxa ay tabardarreysaa difaaca jirka waxaana ay kor u qaaddaa haliska loogu jiro in uu ilmuhu u dhinto oofwareen, duumo, jadeeco iyo cuduro kale oo faafa. Mid ka mid ah lixdii carruurta shan jirka ka yar ee Soomaaliya ayaa ay haysaa nafaqo-xumo daran (FSAU 2008), iyada oo celceliska nafaqo-xumada jirta uu yahay 18.6% Nafaqo-xumada Guud iyo 2.5% oo ah Nafaqo-xumada Ba'an, kuwaas oo si aad ah uga sarreeya halka ugu hooseysa ee caalami ahaan jirta (.15%, WHO). Badnaanta nafaqo-xumada ba'an iyo tirada carruurta ay saameysey arrintuna waxa ay ku sii xun yihiin gobollada dhexe iyo kuwa koonfureed. Haseyeeshee, waxaa la arkayaa goobo magaalooyin ah iyo xerooyinka dadka gudaha ku barakacay ee waqooyiga ku yaalla oo ay ka jirto nugeyl aad u weyn.

Waxqabadka muddada fog ee UNICEF iyo La-hawlgalayaasheeda ay kaga hortegayaan nafaqo-xumada waxaa ku jira sii wanaajinta helidda cunto tayo sare leh iyo daryeel caafimaad; wanaajinta aqoonta caafimaadka iyo habdhaqanka caafimaadka; si taabogal ah u dhiirigelinta in caanaha naaska oo keliya la siiyo ilmaha lixda bilood ee ugu horreysa noloshiisa; dhiirigelinta habdhaqanka quudinta is-dhammeystireysa ee dhammaan carruurta ay da'doodu u dhaxaysa 6–24 biloood – iyada oo diiradda la saarayo hubinta in carruurtu ay heleen cunto dheeri ah oo u habboon da'dooda (iyada oo la isticmaalayo cuntada iyo nafaqada dheerigi ah ee degaanka laga helo); iyo wanaajinta nidaamyada biyaha iyo fayadhowrka iyo hab-dhaqanka nadaafadda si carruurta looga badbaadiyo cudurada la isu gudbiyo.

Taabagalnimada waxqabadyada quudinta ee lagu daweynayo Nafaqo-xumada aadka u ba'an ayaa dunida lagu ballaariyey iyada oo la raacey istiraatiijiyad cusub oo la bixinayo nafaqo aasaasi ah iyada oo la adeegsanyo cunto fudud oo u diyaarsan in la cuno,

**Mid ka mid ah lixdii carruur Soomaali ah ee ka yar 5 jir ayaa au haysaa nafaqo-xumo ba'an**

## *Plumpy'doz:* Dhammeystiridda daaweynta degdegga ah ee nafaqo-xumada ba'an

nafaqadeedu aad u sarreyso oo waxna lagu daweeyo. Ilaa 2006dii, badi carruurta ay hayso nafaqo-xumada ba'an, ee aan qabin dhibaatooyin caafimaad oo waaweyn, ayaa lagu daweeyaa cuntada u diyaarsan cunista (Plumpy Nut), iyaga oo gurigooda jooga, oo ayna kormeerayaan hooyooyinkooda ama ciddii kale ee xannaaneynaysa. Istiraatiijiyaddani waxa ay awood inoo siisey in aan gaarno carruur badan, waana mid ay si wanaagsan u oggol yihiin bulshooyinka, ayna yar yihiin kuwa joojinaya oo sidaa daraaddeedna ay hoos u dhigtey dhimashadii xad-dhaafka ahayd ee ay keeni jirtey Nafaqo-xumada Ba'an. Haseyeeshee, meelaha aya ka jiraan arrimaha murugsan ee degdegga ah sida Soomaaliya oo kale, oo gaaridda dadka ay kooban tahay oo ay marar badan ay kala go'do hirgelinta waxqabadyada degdegga ah iyo sidoo kale kuwa muddada dhexe iyo muddada fog, waa in markaa aan helnaa habab cusub oo tallaabooyin ka-hortag loogu soo daro waxqabadyada arrimaha degdegga ah.

*Plumpy'doz* waa mid ka mid ah cuntada u diyaarsan in la cuno ee dhowaan la soo saarey taas oo loogu talogalay in ay kaabto cuntada caadiga ah iyo/ama cuntada la heli karo si loo buuxiyo baahida nafaqo ee ay qabaan carruurta yaryar ee jira 6 ilaa 36 bilood taas oo ka dhigan tallaabo muddada dhow ah looga hortagayo nafaqo-xumada ba'an. Sida cuntada kale ee u diyaarsan cunista ee wax lagu daweeyo (Plumpy Nut), *plumpy'doz* waa mid ammaan ah, dhadhan leh oo jilicsan waana mid ay si fudud u cuni karaan carruurta ay da'doodu ka bilaabato lix bilood. Cuntada u diyaarsan in la cuno waxa ay ka kooban tahay macaadin iyo fitamiino waxaana ku jira dhammaan nafaqada aasaasiga ah ee loogu talogalay in ay daboosho baahida carruurta yar ee ay da'doodu u dhaxayso 6 ilaa 36 bilood. Xog laga soo ururiyey tijaabooyin bilow ah oo lagu sameeyey dalka Nayjar ayaa tilmaamaya in ay taabagal u tahay ka-hortagga nafaqo-xumada ba'an, iyo in si aad ah ay dadku u oggol yihiin iyo weliba in si bilow ah loogu doodey in ay ka hortegeyso korriimo-xumada. Bilaha soo socda, UNICEF waxa ay gaari doontaa in ka badan 130,000 oo carruur ah oo ku nool degaannada ay halista ugu badan ka jirto ee xerrooyinka dadka soo barakacay ee Boosaaso oo waqooyiga ah iyo Shebeellaha Dhexe iyo Shabeellaha Hoose oo koonfurta ah. *Plumpy'doz* ayaa la gaarsiin doonaa dadweynaha la beegsadey iyada oo loo marsiinayo lahawlgalayaasha UNICEF, xarumaha caafimaadka ee shaqeynaya, kooxaha caafimaadka ee wareega iyo iyada oo ka mid ah hawlaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta. Maaddaama ay tani tahay istiraatiijiyad cusub oo saameyn ku yeelan karta ka-hortagga nafaqo-xumada oo si taabogal ahna u kaabi karta waxqabadyada hadda jira, UNICEF iyo lahawlgalayaasheeda waxa ay dadaal u gelayaan in ay xusuusqoraan waayo-aragnimada la helo oo ay ka mid tahay lafagurka kharashka iyo faa'iidada si ay talo uga bixiso in lagu ballaariyo Soomaaliya iyo sidoo kale dunida oo dhan.

## Iyada oo kaashaneyso wasaaradaha, UNICEF waxa ay gargaartaa carruurta ku nool xeryaha Dadka Gudaha ku Barokacay ee Boosaaso

Xero buux-dhaaftey oo Dadka Gudaha ku Barakacay deggan yihiin oo ku taalla Boosaaso, Puntland, Saynab (ma aha magaceeda runta ah), oo ah 70 jir dhowaan timid ayaa u barooraneysa caafimaadka ilmaha 1 ½ jirka ah ee ay ayeyda u tahay: "Alxamdullilaahi, gabadha aan ayeeyda u ahay ee Maymuuna haddiiba ay ii nooshahay. Ma garaneynin waxa ku dhacay. Ka hor inta aanan imaanin xeradan Boosaaso, bil ayaa ay la xanuunsaneysay qandho, qufac, caatoobid iyo shuban. Waxaan u malaynayey in ay dhimman doonto. Markii aan gaarey MCH-ka [Xarunta Daryeelka Hooyada iyo Dhallaanka] ee ku taalla xerada Dadka Gudaha ku Barokacay ee Boosaaso, kaalkaalisada ayaa ii sheegtey in ay hayaan nafaqo-xumo, caabuqa sambabada, iyo gooryaan. Indhahana waa ay ka jiraneyd waxaana ay u badneyn horeba u indho-beesho fitamiin A la'aan oo ay kaalkaalisadu ii sheegtey in si fudud looga heli karo MCH kasta."


*Maymuuna oo joogta MCH-ka ku yaalla xerada dadka gudaha ku barokacay ee Boosaaso.* © *UNICEF Somalia/2008*

Saynab iyo Maymuuna waxa ay ka mid yihiin 40,000 oo ku nool xerooyinka xaaladdoodu sii xumaaneyso ee Dadka Gudaha ku Barokacay ee Boosaaso ka dib markii ay ka soo qaxeen Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya. Maymuuna oo hooyadeed iyo walaalkeed oo afar jir ahaa lagu diley duqeyn dhowaan ka dhacdey Muqdisho waxaa hadda haysa ayeydeed, taas oo ku guuleysatey in ay ku soo safarto waddada dheer ee dhibaatada badan ee Boosaaso. Dadka gudaha ku barokacay waxa ay ku nool yihiin xerooyin aad u liita oo inta badan dadku buux-dhaafiyeen oo nadaafaddooduna yar tahay. Dadka Gudaha ku Barokacay waxa ay helaan adeegyo daryeel caafimaad oo kooban taas oo ay keentey sababo bulsho-dhaqaale oo kala duwan. Intaa waxaa u sii dheer, in dadka dhowaan yimid xerooyinka dadka gudaha ku barakacay uu hooseeyo wacyigooda la xiriira caafimaadka iyo nafaqeynta, dabeecaddooda raadsashada caafimaadka uu hooseeyo, iyo hab-dhaqankooda nafaadadeed iyo kan fayadhowr uu liito. Carruurta waxaa haysta qashin-saarka oo meel walba daadsan, biyo la cabbi karo oo aan la haysan, hab-dhaqanka nadaafadda iyo gacmo-dhaqasahda oo liita, taas oo halis u gelinaya shuban iyo cudurada kale ee la is-qaadsiiyo.

Si wax looga qabto baahiyaha caafimaad iyo kuwa quudinta ee Dadka Gudaha ku Barokacay ee Boosaaso, UNICEF waxa ay ka taageereysaa Wasaaradda Caafimaadka ee Puntland bixinta adeegyada daryeelka caafimaadka ee ay ku bixiso afar xarumo MCH oo ku yaalla degaannada Dadka Gudaha ku Barokacay, iyo Bukaan-socod-eegto nafaqeynta ku daweysa oo dadka bukana loo soo gudbiyo taas oo bartilmaameedsaneysa dadka gudaha ku barokacay. UNICEF waxa ay sidoo kale sameysay olole bulshada lagu abaabulayo laguna wargaarsiinayo kaas oo ay ka faa'iideysanayaan 40,000 oo Dadka Gudha ku Barokacay ah oo ay ka mid yihiin 8,000 oo carruur shan sano jir ka yar ah iyo 2,000 oo haween uur leh ah. Istiraatiijiyada u horreysa waa in kor loo qaado waxqabadyada dadka wada gaara oo waxtarka badan leh oo kharashkooduna yar yahay sida ololayaasha tallaalka oo loo maro dadaallo cusub sida Maalmaha Caafimaadka Carruurta.

In ka badan 300 oo qof oo qaba shuban biyood ba'an (oo in ka badan 150 ay yihiin carruur ka yar shan jir) ayaa loo direy laguna daweeyey Cusbitaalka Guud ee Boosaaso bilihii Sebtembar iyo Nofembar. Xaaladda caafimaadka iyo tan nafaqada ee xerooyinka dadka gudaha ku barokacay ee Boosaaso ayaa hore u soo wanaagsanaatey.

**Cudurro si fudud looga hortagi karo sida shubanka ayaa weli sii laynaya carruurta…**

## Ololaha ka hortagga Jadeecada iyo Waxqabadyada Nafaqeynta ee Waddada Afgooye

Bishii Sebtembar 2007 dadka Muqdisho deggan ayaa bilaabey in ay ka cararaan rabshadihii ku xoogeystey magaalada waxaana ay degeen waddada waqooyiga Muqdisho ku taalla ee u socota degmada Afgooye, taas oo la baxdey magaca hadda loo yaqaan ee "Afgooye *corridor*". Dhulkaa oo qiyaastii ah 18 km waxa ku yaalla xerooyinka ugu badan ee dadka gudaha ku barakacay ee adduunka oo dhan waxaana ay gaarayaan in ka badan 311,000 oo qof, badidooduna ay yihiin haween iyo carruur, waxaana dadka ku jira ay ku nool yihiin cooshado aan si fiican loo dhisin. Xaaladda nabadgelyada ee aan deganneyn ayaa ku sii adkeysey in hay'adaha gargaarku ay kaalmeeyaan dadkaas maaddaama weerarada lagu qaado shaqaalaha gargaarku ay soo noqnoqdaan. In kasta oo ay taas jirto, haddana UNICEF iyo lahawlgalayaasheeda waxa ay sii wadaan in ay gargaaraan dadkaas.

Bulsho ay kartideeda wax iibsasho ay yareysey qiimaha cuntada ee kor u kacay oo ay haqab-beel la'aanta cuntada ee qoyasaskuna ay sii xumaaneyso, waxaa muhiim ah in markaa carruurta laga ilaaliyo cudurada dilaaga ah sida jadeecada, iyada oo isla markaana la hubinayo in ay helayaan cunto tiro iyo tayo ahaanba ugu filan in ay ka ilaaliso nafaqoxumada. Mid ka mid ah dhibaatooyinka ay keento nafaqo-xumada waa iyada oo daciifisa hannaanka difaaca jirka taas oo ilmaha ka dhigta mid u nuqul cuduarada – iyada oo cuduraduna ay inta badan saameyn ku yeeshaan xaaladda nafaqo ee ilmaha taas oo ka dhigta mid u nugul in ay asiibto nafaqo-xumo aad u ba'an oo loo dhinto. Cudurka iyo nafaqo-xumada ayaa noqda meerto dhib badan oo ay muhiim tahay in la jebiyo taas oo ah sababta ay UNICEF diiradda ugu saartey daaweynta nafaqo-xumada iyo tallaalka jadeecada in ay ahaadaan labada waxqabad ee ugu muhiimsan waxqabadyada caafimaadka iyo nafaqeynta ee Afgooye laga wado.



*Ilmo laga tallaalayo jadeeco intii uu socdey ololaha Afgooye.*
*© UNICEF Somalia/2008*

Sanadkii 2007 waxaa sidoo kale bilowdey diyaar-garow lagu furayo barnaamijyo quudinta lagu daweynayo carruurta ay hayso nafaqo-xumada ba'an. Ka dib markii ay tababar ka heshey UNICEF, Hay'adda Gargaarka Islaamka ee Ingiriiska ayaa bishii Jannaayo 2008 Afgooye ka furtey barnaamijyadii cunto-ku-daweynta bukaansocodka ee ugu horreeyey Afgooye. Hal xarun oo deg gan iyo hal koox oo wareegta oo soo abaabusha bulshada, carruurta ka baarta nafaqo-xumada oo u soo dirta xarunta quudinta si loogu daweeyo ayaa la sameeyey. Ilaa bilowgii barnaamijka, in ka badan 900 oo carruur ah ayaa laga daweeyey nafaqo-xumo aad u ba'an, waxaa waxqabadkan nafaha lagu badbaadinayo bil kasta ka faa'iideysta 400 oo carruur ah. Koox kale oo wareegta ayaa u diyaar ah in ay shaqo bilaabo toddobaadyada soo socda si looga shaqeeyo degaan kii hore ka ballaaran.

Iyada oo ay keentey dadka gudaha ku barkacay ee ku soo qulqulaya Afgooye, oo ay uga sii dartey haqab-beel la'aanta cuntada, UNICEF waxa ay bishii Maajo bilowdey in carruurta jirta 6 – 69 bilood ay si guud u siiso badarka lagu xoojiyey fitaamiinka iyo macaadiinta ee la yiraahdo UNIMIX waxaana si joogto ah carruur ku dhow 55,000 ugu qaybiya ururka *Jumbo Peace and Development Organization (JPDO)*. JPDO waxaa kale oo ay sameeysey wareeg cusub oo tallaalka jadeecada ah. Dhammaadkii Agoosto ilaa bilowgii Sebtembar ee sanadkan, carruur ka badan 142,600 oo da'doodu u dhaxayso 9 bilood ilaa 15 sano ayaa jadeecada looga tallaaley ololihii ugu dambeeyey ee laga sameeyey Muqdisho iyo Afgooye.

Ololahan tallaalka jadeecada ee ugu dambeeyey waxaa uu dhammeystir u yahay ololihii sanadkii 2007 ee lagu gaarey 450,000 carruur ay da'doodu u dhaxayso sagaal bilood ilaa 15 sano jir oo ku nool Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya ah. Ololaha hore waxa uu keeney in xaaladaha jadeecada ay hoos uga soo degaan 3,838 nuskii ugu horreeyey ee sanadkii 2006 oo ay noqdaan 565 xaaladood isla muddadaas sanadkii 2007, oo ay dhimashada dalka oo dhan laga soo sheegeyna ay ahayd toddoba qof oo keliya. Ololayaashan ayaa qayb ka ah dadaal dunida oo dhan ka socda oo looga dan leeyahay in hoos loo dhigo dhimashada ay keento jadeecada 90 boqolkiiba dunida oo dhan marka la gaaro sanadka 2010 (iyada oo la barbardhigayo sanadkii 2000), waana dadaal taageero ka hela Hindisaha Jadeecada (*Measles inititative*) – oo ah isla-hawlgalayaal ay hogaamiso Laanqeynta Cas ee Mareykanka, Xarunta Xakameynta iyo Ka-hortagga Cudurada ee Mareykanka, UNICEF, Mu'asasada Qaramada Midoobey iyo WHO, oo taageero ballaaranna ka hela Isbahaysiga Caalamiga ah ee Tallaallada iyo Kaguriyeynta Cudurada (GAVI) iyo kooxo kale.

Suuragal ma ahan in la sheego tirada nafaha lagu badbaadiyey waxqabadyada ay taageerto UNICEF laakiin, waxaa la hubaa in ay ka qaybqaateen ka hortagga dillaacidda cudurka jadeeecada iyo sidoo kale ka hortagga xaaladda nafaqo-xumada (iyada oo hadda ay xaaladdu ka wanaagsan tahay sidii caadi ahaan ay ahaan jirtey Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya). Xaaladdu weli waa ay xun tahay, laakiin iyada oo culaysyo/taxaddiyaad jiraan haddana waxaa jirta rajo ay leeyihiin carruurta ku nool xerooyinka dadka soo barkacay ee ugu weyn dunida oo dhan.

**Keliya 5 boqolkiiba carruurta ka yar 1 sano ayaa qaatey dhammaan tallaalladii la rabey…**

# Kor u qaadista ka hortagga duumada/malaariyada ee Soomaaliya oo dhan

"*Jiro ragaaleed*" ayaa Af-soomaaliga qaar loogu yaqaan duumada oo inta badan timaadda ka dib labada xilli-roobaad ee dalka. Aqoonta dadka degaanku ay u leeyihiin cudurka ayaa keentey in bulshadu ay xiiso u qaadaan ayna oggolaadaan in marokaneecada looga hortego duumada. UNICEF oo ka faa'iideysaneysa arrintaan ayaa waxa ay laga soo bilaabo 2005tii bulshada ay saameysey duumada ee Soomaaliya ay u qeybisey in ka badan 1 milyan oo Marakacaneecooyinka Cumriga Dheer ee Daaweysan ah.



*Haweeney Soomaaliyeed oo joogta Jubbada Hoose oo la tusayo sida loo diyaariyo marokaneecada cumriga dheer ee daaweysan .* © *UNICEF Somalia/2008*

Duumadu waa dhibaato caafimaad oo ka jirta Soomaaliya waxaana lagu qiyaasey in sanad kasta Soomaaliya ay ku dhacdo ku dhowaadkii 600,000 ayna keento ilaa 3,500 oo dhimasho ah (Warbixinta Duumada ee 2008, WHO). Cudurku waxa uu saameeyaa dhammaan dadka da'doodu kala duwan tahay sababta oo ah qaabka isugudbinta (mid hooseeya oo aan sugneyn) oo ah mid aaney dadku adkeysi u yeelaneyn. Isqaadsiinta duumada waxa ay ugu badan tahay Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya, badiba dhulka u dhexeeya oo u dhow webiyada Jubba iyo Shabeelle. Waxaa kale oo jira deegaanno gaar ah oo Somaliland iyo Puntland ka tirsan oo iyana la isugu gudbiyo cudurka.

Deegaanka noocaan ahi, marakaceenada cumriga dheer ee daweysani ayaa la hubsadey in ay tahay ka hortagga ugu wanaagsan ee duumada. Sanadkii 2007dii tirooyinka ka soo baxay Soomaaliya ayaa tilmaamey in dadka galay marakaneecada ay 54% ay ka yar tahay in ay ku dhacdo duumo (WHO, 2008). Iyada oo taageero laga helayo Sanduuqa Caalamiga ah ee la Dagaalanka AIDS-ka, Qaaxada iyo Duumada, UNICEF waxa ay kor u qaaddey qaybinta marakaneecooyinka cumriga dheer ee daaweysan min 132,000 oo la qaybiyey 2005tii ilaa in ka badan 400,000 oo la qaybiyey 2007dii. Waxaa la saadaaliyey in dhammaadka sanadka 2008, la qaybin doono 600,000 oo marakaneecooyinka cumriga dheer ee daweysan ah taas oo keeneysa in la gaarsiiyo in ka badan 60% qoysaska ku nool meelaha ay duumadu ku badan tahay.

Si loo gaaro yoolalkaa, UNICEF waxa ay kala shaqeyneysaa lahawlgalayaal badan oo ka kooban NGO caalami ah iyo kuwo bulshada degaanka ah in ay lacag la'aan ku qeybiyaan marokaneecooyinka iyaga oo loo marayo ololayaal qaybineed oo bulshada ku dhisan. Culaysyo ayaa lala kulmey intii ay hawshu socotey kuwaas oo ka dhashey iskahor-imaadyada socdey iyo kaabayaasha dalka oo iyana xumaa. Heseyeeshee, iyada oo ay culaysyadaasi jireen, haddana marka ay wadooyinku xiraan roobabka waaweyn ee da'a waxaa la raadinayey xalal degaanka u habboon sida in la adeegsado doomo iyo dameero si marokaneecooyinka daweysan ee cumriga dheer loo gaarsiiyo meelihii loogu talogalay. Iyada oo laga faa'iideysanayo aqoonta bulshadu ay degaanka u leeyihiin iyo taageeradooda, UNICEF iyo la-hawlgalayaasheedu waxa ay ku kalsoon yihiin in kor-u-qaadista qaybinta marokaneecooyinka cumriga dheer ee daaweysani uu socon doono iyo in la gaari doono ujeeddada la leeyahay ee ah in la gaaro yoolka kunka sano ee ah in la hakiyo oo marka dambena la rogo cudurka duumada.

# Bulso baratey sidii ay isaga ilaalin lahayd cudurka Duumada

"Weligeen dhibaato ayaa ay kaneecadu naga haysey haddaan nahay dadka ku dhaqan magaalada Buulow laakiin maalmahan xataa cayayaanka kale sida baranbarada, duqsiga, dhiqlaha iyo cayayaanada kale ee la midka ah ayaan la arag ilaa intii marokaneecooyinka la keeney guryaheena hal bil ka hor," ayaa ay tiri Luul Maxamed Nuur.

Luul, oo ah hooyo Soomaaliyeed oo 30 sano jir ah oo shan carruur ah leh ma ahan qof qeyru-caadi ah, ee waa qof ka mid ah ka-faa'iideystayaasha marokaneecooyinka cumriga dheer ee la daweeyey ee dhowaan lagu qeybiyey gobolka Bakool iyada oo u mahadcelineysa UNICEF iyo la-hawlgalayaasha hawsha fuliyey. Dhowr qof ayaa sheegey in ay arkeen faa'iidooyinka la heley markii hawsha loo marey bulshada iyada oo marokaneecooyinka loo qaybiyey guri-ka-guri.

UNICEF oo kaashaneysa la-hawlgalayaasha kala ah IMC iyo LPC ayaa dhowaan 66,000 oo marokaneecooyin ah ka qaybiyey gobolka Bakool ka hor xilligii deyrta (oo ah xilli roobaad) taas oo qayb ka ah ololayaasha qaybinta marokaneecooyinka ee ka socda dhammaan Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya ee taageerada ka heley Sanduuqa Caalamiga ah ee wax ka qabashada Qaaxada iyo Duumada. Gobolka Bakool badidiisu waa dhul qalalan oo oomane ah laakiin degaanka ay Luul deggan tahay, oo ah Degmada Xuddur, waxa uu leeyahay ceelal waxaana lagu yaqaan in uu leeyahay meelo ay biyaha fadhiyaan dhowr bilood ka dib xilliyada roobabka (Gu'ga iyo Deynta). Goobahaas ayaa ah meelaha ay kaneecadu sida badan ugu taranto taas oo keeneysa in duumadu faafto, taana waa tan keentey in degaankaa loo doortey in laga qeybiyo marokaneecooyinka cumriga dheer ee daweysan.

Maaddaama dad badan oo ku nool degaannada miyiga ee Soomaaliya aaney heleynin wararka ku saabsan arrimaha caafimaadka, barnaamijka duumada ee ay taageerto Sanduuqa Caalamiga ah ee wax ka qabashda Qaaxada iyo Duumada waxa uu xoogga saarey waxbarashada caafimaadka iyada oo qayb ka ah geedi-socodka qaybinta Marokaneecooyinka Cumriga Dheer ee Daweysan. Bulshada oo lala sheekeysto ka hor inta aan la qaybin iyo ka dib marka la qaybiyo ayaa dhiirigelineysa farriimaha la xiriira sida looga hortago iyo sida loo daweeyo duumada.

Markii la weydiiyey in ay garaneyso sida la isu qaadsiiyo duumada, Luul waxa ay si sax ah u tilmaantey in kaneecada oo ku qaniinta ay tahay sababta ay dadku u qaadaan duumada waxaana ay ammaantey marokaneecooyinka cumriga dheer ee daweysan ee iyada iyo carruurteeda ay gurigooda ku isticmaalaan oo ah mid looga hortago karo qaniinyada kaneecada. Luul waxa ay garatey qaar ka mid ah tilmaamaha qofka qaba duumada laakiin aqoonta yar ee ay u leedahay baahida loo qabo in si degdeg ah daawo loo doonto ayaa tusaysa in loo baahan yahay shaqo badan oo la qabto si kor loogu qaado wacyiga.

"Maaddaama ay dadku si wanaagsan u fahamsan yihiin sida la isugu gudbiyo duumada iyo sida ay naftooda u ilaalin karaan, waxaa loo baahan yahay in aan dadaalkeena u weecinno sida loo sii wanaajinayo hab-dhaqanka daawo raadsashada. Waa in aan had iyo jeer dhiirigelinaa in degdeg daawo u qaadashada ay muhiim u tahay taabogalnimada daawada. "Dr. Cabdinuur Maxamed oo ah iskuduwaha hawlaha duumada ee soonka ayaa sidaa yiri.

**Duumada waxa ay sanad kasta ku dhacdaa 600,000 oo Soomaali ah…**

## Iyada oo UNICEF taageereyso, bulsho tallaabo ka qaaddey nafaqo-xumada

Gaaridda Yoolalka Horumarka Kun-sanadka iyo dabar-goynta saboolnimada ayaa u baahan in hoos laga soo dhiso iyo in laga qaybgelinayo bulshada iyo mad-axda degaannadaba. Bulshooyinka ayaa door muhiim ah ka cayaaraya aqoonsa-shada waxyaabaha muhiimka u ah iyo waxa ay u baahan yihiin, waxaana ay awood u leeyihiin in ay si taabogal ah u habeeyaan ayna uga faa'iideystaan dhaqaalaha loogu talogalay yareynta saboolnimada.

Arrintani waxaa daliil u noqotey bulshada Daroole oo ku taalla Degmada Berbera ee Somaliland halkaas oo Guddiga Horu-marinta Bulshada ay ka welwelsanaayeen nisbada nafaqo-xumada ee bulshadooda oo kor u kacdey taas oo ka dhalatey ab-aar yareysey cuntadii la heli jirey – xaaladdaasi oo ahayd mid saameyn ku yeelatey qoysas badan iyada oo haweenka iyo carruurtuna ahaayeen kuwa ay soo gaartey dhibta ugu badan.

Guddiga Horumarinta Bulshada ee Daroole waxa uu xaqiiqsadey in loo baa-han yahay in la qaado tallaabo degdeg ah si wax looga qabto xaaladda, halkii ay bulshadu ka sugi lahayd ururada gar-gaarka. Sidaa daraaddeed Guddiga Horu-marinta ee Bulshada waxa uu abaabuley bulshada in ay sameeyaan qiimeyn lagu ogaanayo qoysaska dhibta ugu badani ay soo gaartey. Waxaa la diiwaangeliyey 150 qoys iyada oo la raacayo shuruudo ay dejiyeen Guddiga Horumarinta Bulshada ayna oggolaadeen guud ahaan bulshada, iyada oo loo eegay qoysaska aadka u liita, leh tirada ugu badan ee carruurta ay nafaqo-xumadu hayso iyo hooyooyinka hadda carruurta nuujinaya. Qiimeynta ka dib, Guddiga Horumarinta Bulshada waxa uu u qareemeeyey taageero uu u helo qoysaska iyaga oo u soo marey Sarkaalka Caafimaadka ee Gobolka kaas oo u soo gudbiyey WFP. 150ka qoys ayaa haatan bishiiba ka helaya WFP raashin iyada oo ay u soo marsiineyso la-hawlgalayaasheeda degaanka taasna waxa ay ka dhalatey dadaalkii ay sameeyeen Guddiga Horumarinta Bul-shada. Arrintan waxa ay u suurtagalisey in Guddiga Horumarinta ee Daroole ay badbaadiyaan nafaha carruur ay nafaqo-xumo soo wajahday.

Guddiga Horumarinta Bulshada ee Daroole waa urur sharciyeysan oo u shaqeynaya Urur Bulsho Ahaan oo leh 10 xubnood (3 haween ah iyo 6 rag ah) oo lagu soo doortey nidaam ay bulshadu ka wada qayb-qaadatey si uu u kormeero hawlaha horumarinta ee bulshada. Gud-diga waxaa uu ka soo baxay geeddi-socod abaabulka iyo awood-siinta bul-shada ah ee ay taageertey UNICEF iyada oo qayb ka ah mashruuc wadajir loo fuli-nayo oo ku saabsan Soo-kabashada iyo Horumarinta Bulshada ku dhisan kaas oo ay taageeraan UNICEF, Golaha Qaxootiga Denmark, UNHABITAT, DFID iyo Bankiga Adduunka.

Mashruucu waxa uu bulshada ka dhi-gayaa ubucda qorsheynta iyo sixidda adeegyada bulshada taas oo awood u siineysaa in ay dejiyaan ajandaha horu-marinta iyo in ay saameyn ku yeeshaan madaxda iyaga oo ah dad wax og. Dham-maan waxqabadyadan waa kuwo ku dhi-san baahi jirta: UNICEF waxa ay sii wadi doontaa taageerada ay siiso dadaalka nafaqeynta dadka ee Daroole iyada oo sii wadi doonta sameynta baaritaanka nafaqada iyo iyada oo u gudbinaysa halkii lagu daweyn lahaa dadka u baahan daaweynta iyo sidoo kale in ay u sameyso Guddiga Horumarinta Bulshada karti-dhisid la xiriirta aqoonta nafaqeynta ee aasaasiga ah iyo sidoo kale in ay sa-hamiso waddooyinkii lagu abuuri lahaa taageerada iyo wacyigelin loo sameeyo Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee



*Qoysaska nuqul ee Daroole oo la siinayo raashin. © UNICEF Somalia/2008*

## Warbixin Gaar ah: Dagaalka lagu soo af-jarayo cudurka Dabaysha

Soomaaliya kama jirin cudurka dabaysha muddadii u dhaxaysay 2002-2005 illaa uu ka soo gaarey Fayrus Waxshi ah oo keena Cudurka Dabaysha oo asal ahaan ka soo jeeda Nayjeeriya. Cudurkaa oo si weyn uga dillaacay Muqdisho bishii Luulyo 2005 waxa uu keeney in 230 carruur yaryar oo Soomaali ahi ay curyaamaan. Ilaa waqtigaa, WHO, UNICEF iyo la-hawglayaashooda ayaa taageerey qiyaastii 30 wareeg oo maalmaha qaranka ee tallaalka cudurka dabaysha ah kuwaas oo midkiiba lagu gaarey 1.4 milyan oo carruur ay da'doodu ka yar tahay shan jir ah. Dadaalladaa wadajirka ah ayaa ku guuleystey in ay hakiyaan isu-gudbinta fayruska dabaysha ee waxshiga ah taas oo keentey in Soomaaliya aanu ka jirin cudurka dabeysha sanadkii iyo barkii la soo dhaafey (kii ugu dambeeyey waxaa bishii Maarso 2007 laga soo sheegey Hobyo, Mudug).

Sanadkii 2008, in ka badan 1.8 milyan oo carruur ay da'doodu ka yar tahay shan jir ayaa lagu tallaaley afar maalmood oo Maal-maha Tallaalka Qaranka ahaa. Ololayaashaasi intii ay socdeen, 1.4 milyan ayaa ka faa'iidestey Fitamiin A la siiyey iyo 1 milyan oo iyana ka faa'ideystey waxqabadyada goryaan ka-dilidda (oo la siiyey kiniiniga *albendazole*). In ka badan 10,000 oo iskaa-wax-u-qabsadayaal ah ayaa la dhigey Soomaaliya oo dhan si ay u fuliyaan ololaha. Maalmaha Tallaalka Qaranka ayaa loo fuliyey si aan isku mar ahayn taas oo ay keentey nabadgelyo xumada.

Si loo adkeeyo guriyoobidda carruurta shan jirka ka yar iyo si loo wado hawlaha bixinta Fitamiin A iyo goryaan ka-dilidda, UNI-CEF, WHO iyo la-hawlgalayaasha kale waxa ay qorsheynayaan ugu yaraan laba jeer oo la fuliyo Maalmaha Tallaalka Qaranka nuska hore ee sanadka 2009.

Iyada oo sal looga dhigayo guulihii lagu soo hoyey ololayaashii hore iyo kuwa hadda socda ee tallaalka cudurka dabaysha ee Soomaaliya, Maalmaha Caafimaadka Carruurta waxa ay beegsan doonaan bixinta waxqabadyada badan ee lagu badbaadinayo carruurta, oo uu ku jiro tallaalka cudurka dabaysha, si loo yareeyo dhimashada carruurta da'doodu ka yar tahay shan jirka iyada oo gacan laga helayo dhammaan la-hawlgalayaasha, NGO-yada iyo deeq-bixiyeyaasha.

**Nisbada carruurta tallaallan ee Soomaaliya waa tan 2aad ee ugu hooseysa adduunka oo dhan...**

## Wax ku qaadashada wixii la soo marey, Beegsashada Mustaqbalka – Gacan ka geysashada Badbaadinta Nolosha Caruurta

UNICEF waxa ay Soomaaliya ka shaqeyneysaa ilaa 1972dii. Iyada oo la shaqeyneysa dowladda, dowladaha hoose iyo ururada diinta, ururada bulshada iyo ururada aan dowliga ahayn UNICEF waxa ay awood u yeelatey in ay gacan ballaaran ka geysato dhinaca caafimaadka iyo nafaqeynta iyada oo bixinaysa sahay iyo qalab caafimaad, tallaal, qaboojiyeyaal, tababar ay siiso shaqaalaha caafimaadka iyo nafaqeynta iyo awood-dhisid ay u sameyso maamullada degaanka.




© UNICEF Somalia/HQ93-BOU0636-PRESS

In kast oo istiraatiijiyado kala duwan wax looga qabanayo arrimaha daryeelka caafimaadka, haddana baahida wadagaarsiinta tallaalka iyo wax ka qabashada nafaqo-xumada ba'an ayaa ah kuwo taagnaa 15kii sano ee la soo dhaafey. In kasta oo wax-qabadyada UNICEF iyo NGO-yada la hawlgala ay ballaariyeen adeegyada iyo hantida ay gaarsiinayaan dadka saboolka ah ayna badbaadiyeen nafo badan, haddana nafaqo-xumada iyo heerka cudurada ayaa weli sarreeya waxaana weli hooseeya adeegyada dhibaatooyinkaas wax looga qabanayo.

Lafa-gurid lagu sameeyey dhibaatada jirta ayaa lagu ogaadey waxyaabahan soo socda:
Soo raadsashada daryeelka caafimaadka gaar ahaan daryeelka caafimaadka ee ka hortagga ayaa weli hooseeya

1. Qiimaha daaweynta ayaa ah mid ka mid ah caqabadaha faraha badan ee dadka ka hor-istaaga adeegsiga daryeelka caafimaadka
2. Soo gaaridda xarumaha caafimaadka (sida, nooliga gaadiidka) ayaa iyana ah caqabad kale oo weyn
3. Waxaa jira sababo badan oo keena nafaqo-xumada iyo cudurada mana jiro hal jid oo keligii si taabogal ah wax uga qaban kara yareyntooda.
4. Waxaa jira xarumo caafimaad iyo MCH-yo badan oo ay UNICEF taageerto, laakiin waa tiro aad uga yar in ay si habboon dadka u wada gaarsiiyaan adeegyo daryeel caafimaad.
5. Xarumaha caafimaadka ee jira ayaa iyana si wanaagsan looga faa'iideysan. [Xalku ma ahan oo keli kordhinta xarumaha caafimaadka – waa in aan helnaa in xarumaha hadda jira ay si taabogal ah u shaqeeyaan si faa'iidooyin dhab ah looga helo.]
6. Waxaa jirta in ay kala go'an tahay aqoonta: ku saabsan kharashka iyo istiraatiijiyooyinka loo baahan yahay in ay dhammaan dadka Soomaaliyeed ay helaan adeegyada daryeelka caafimaadka.
7. Waxaa adag oo kharash badan in qof kasta la gaaro: gaar ahaan bulshooyinka reer miyiga ah ee ku nool goobaha aad u sii durugsan ee ay ku nool yihiin dad aad u tiro yar.
8. Meelaha qaar guulo ayaanu ka soo hoyney gaar ahaan istiraatiijiyooyinka qaranka ee dabargoynta cudurka dabaysha iyo ka tallaalidda carruurta ee cudurka jadeecada.

Si wax looga qabto arrimahan loona sii kordhiyo guulihii hore loo gaarey, UNICEF (iyo WHO iyo la-hawkalyaasheeda) waxa ay qaadayaan afar-tallaabo oo lagu dardargelinayo badbaadada carruurta iyada oo la maalgelinayo:

1. Barnaamijyo dhinaca xogta iyo waxbarashada dadweynaha ah kuwaas oo qoysaska Soomaalida ah lagu siinayo aqoonta ay ugu baahan yihiin in ay waxa ay haystaan ku maareeyaan caafimaadka qoyskooda – iyo in ay gartaan marka ay u baahan yihiin in ay raadsadaan daryeel caafimaad iyo halka ay ka helayaan.
2. Ololaha "Maalmaha Caafimaadka Carruurta" oo lixdii biloodba mara lagu gaarsiinayo dhammaan tuulooyinka Soomaalida xirmo adeegyo kharash yar, saameyn caafimad, quudin sare leh iyo waxqabadyo biyaha/nadaafadda ku aaddan oo ay ka mid yihiin Fitamiin A, goryaan ka dilid, dhiirigelinta naas-nuujinta iyo gacmo-dhaqashada, biyaha oo lagu daweeyo guriga, maareynta cudurada shubanka, baaritaanka nafaqada iyo daawo u diridda iyo tallaalidda. Istiraatiijiyadani kuma koobna oo keliya daaweynta carruurta nafaqo-xumadu hayso ee waxa ay tiigsatey in ay ka hortagto nafaqo-xumada ba'an ee kooxaha ugu nugul (oo ah, carruurta da'doodu tahay 6 bilood ilaa 3 sano) iyada oo carruurta ku nool degaannada la soo xushey la siinayo cunto tayadeedu/tamarteedu sarreeyaan.
3. Wanaajinta tayada adeegyada ay bixiyaan xarumaha caafimaadka ee dadweynaha iyada oo shaqaalaha la tababarayo; la wanaajinayo sahayda daawada; la bixinayo adeegyada hooyada iyo caafimaadka taranka; korna loo qaadayo kormeerka iyo maareynta si loo abuuro adeegyo ay soo gaari karaan oo waxna u taraya dadka caadiga ah.
4. Cilmi-baarista iyo qiimeynta wixii shaqeeyey iyo waxa aan shaqeynin si wax looga beddelo oo loo wanaajiyo hababka aan u shaqeyno.

**Wixii xog dheeri ah oo ku saabsan barnaamijkeena ama sida aad noo taageeri karto, fadlan nagala soo xiriir:**


| | | |
|---|---|---|
| **Christian Balslev-Olesen, Representative** | **cbalslev@unicef.org** | **+ 254 722 514 569** |
| **Denise Shepherd-Johnson, Chief of Communication** | **dshepherdjohnson@unicef.org** | **+ 254 722 719 867** |
| **Robert Kihara, Communication Officer** | **rkihara@unicef.org** | **+ 254 722 206 883** |


**Nagu soo booqo www.unicef.org/somalia**